# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/WM/222-1222/032024** **Taar: 09/03/2024**

# Wareegto Madaxweyne

**Dhaqan-galka Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaan-gelinta Cod-bixiyeyaasha; Xeer Lr. 91/2023.**

**Markaan Arkay:** Qodobbada $75^{aad}$, $77^{aad}$ iyo $78^{aad}$ ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markaan Arkay:** Qoraalka Golaha Wakiillada ee summaddiisu tahay GW/JSL/10/68/2024, kuna taariikhaysan 19/02/2024, Ujeeddadiisuna tahay Soo-gudbinta Go'aanka Ansixinta Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaan-gelinta Cod-bixiyeyaasha, Xeer Lr: 91/2023; (Go'aan Lr. GW/KF- 7/01/2024);

**Markaan Arkay:** Qaraarka Maxkamadda Dastuuriga ah ee summaddiisu tahay MSD/DDL/01/2024, kuna taariikhaysan 07/03/2024 ee ay Maxkamaddu ku laashay Faqradaha $5^{aad}$ iyo $6^{aad}$ ee Qodobka $93^{aad}$ ee Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaan-gelinta Cod-bixiyeyaasha, Xeer Lr: 91/2023;

**Markaan Arkay:** Qaraarka Maxkamadda Dastuuriga ah ee summaddiisu tahay MSD/DDL/02/2024, kuna taariikhaysan 07/03/2024 ee ay Maxkamaddu ku laashay ereyga "Boqollay" ee ku jira Faqradaha $2^{aad}$, $3^{aad}$ iyo $4^{aad}$ ee Qodobka $93^{aad}$ ee Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaan-gelinta Cod-bixiyeyaasha, Xeer Lr: 91/2023;

**Waxaan soo-saaray;**

Wareegtadan oo lagu baahinayo Dhaqan-galka Wax-ka-Bedelka iyo Kaabista Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha ee Xeer Lr. 91/2023 iyo lifaaqyada kala ah:

- Qaraarka Maxkamadda Dastuuriga ah ee summaddiisu tahay MSD/DDL/01/2024, kuna taariikhaysan 07/03/2024, iyo
- Qaraarka Maxkamadda Dastuuriga ah ee summaddiisu tahay MSD/DDL/02/2024, kuna taariikhaysan 07/03/2024.

**Allaa Mahad Leh**

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**Jamhuuriyadda Somaliland**
**Golaha Wakiilladda**

**The Republic of Somaliland**
**House of Representatives**

**Xafiiska Guddoomiyaha - Office of the Speaker**

Mob: +252-513503 (Hargeisa-Somaliland) E-mail: Secretaryspeaker@gmail.com

Ref: GW/SSL/10/58/2024 Date: 19/02/2024

**Ku: Md. Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha JSL** **= Madaxtooyda=**

**UJEEDDO: SOO GUDBINTA GO'AANKA ANSIXINTA WAX-KA BEDELKA IYO KAABIST XEERKA GUUD EE DOORASHOOYINKA QARANKA IYO DIWAANGELINTA XEER. Lr. 91/2024 IYO WAX- KA BEDELKA IYO KAABISTA XEERKA NIDAAMKA URURRADA IYO AXSAABTA SIYAASADA XEER Lr. 14/2024.**

*Mudane Madaxweyne,*

Waxaa aan si Sharaf iyo qadarin leh halkan kuugu soo gudbinaynaa Nuqulada Xeerarka iyo Go'aamada hoos ku qoran: -

1. Go'aanka Ansixinta Wax-ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Guud ee Doorashooyinka Qaranka iyo Diwaangelinta **Xeer Lr. 91/2024**
   **(Go'aan Lr. GW/KF-7/01/2024).**

2. Go'aanka Ansixinta Wax-ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Ururrada iyo Axsaabta Siyaasada Xeer **Lr. 14/2024.**
   **(Go'aan Lr. GW/KF-7/02/2024).**

**ALLAH MAHAD LEH**

**Yaasiin Xagi Maxamuud Xiir (Faratoon)**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL**

GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILADA SPEAKER JAMHUURIYADDA SOMALILAND

RECEIVED 19 FEB 2024 BY: PRESIDENCY Reg. No.:

**Ujeeddo: Go'aanka ansixinta wax-ka-beddelka iyo kaabista Xeerka Guud ee Doorashooyinka Qaranka iyo Diwaangelinta**

**Xeer Lr. 91/2023**

# GOLAHA WAKIILLADU:

Markuu Arkay: - **Qodobka 4aad faqraddiisa 1aad, Qodobka 9aad faqraddiisa 1aad, Qodobka 22aad faqraddiisa 3aad iyo Qodobbada 40aad, 41aad, 42aad, 82aad, 77aad. 78aad, 83aad 111aad faqraddiisa 2aad** ee Dastuurka Qaranka JSL.

Markuu Arkay:- **Dastuurka Qodobka 78aad Faqradda 1aad xarafkiisa (T)** oo sheegaya in Golaha Wakiilladu xaq u leeyahay inuu ku celiyo Golaha Guurtida kal-fadhiga xiga, haddii uu ku qanci waayo wax ka badelka Golaha Guurtida.

Markuu Arkay: - In ay muhiim tahay in laga faa'iidaysto waayo' aragnimadii laga dhaxlay doorashooyinkii kala duwanaa ee ay soo martay bulshada Somaliland, taas oo muujinaysa in loo baahan yahay in la'adkeeyo nidaamka sharci ee suurto gelinaaya in ay muwaaddiniintu codkooda ku dhiibtaan isla markaana la tirtiro in ay dhacdo in lagu noqnoqdo cod-bixinta taa soo sharcidarro ah.

Markuu Aqoonsaday: Baahida loo qabo in dib u habeyn, wax-ka-beddel iyo kaabis lagu sameeyo, dibna loo eego xeerarkii doorashooyinka Madaxtooyada, Golaha Wakiillada iyo Goleyaasha Deegaanka, sidoo kale Xeerkii Diiwaan-galinta Cod-bixiyayaasha.

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay:** | Soo jeedinta Madaxweynaha ee iswaafajinta xeerarka doorashooyinka iyo go'aannadii odayaasha guddida khilaafaadku ka soo saareen xaaladda siyaasadeed ee dalka, taas oo si doorashooyinku ugu dhacaan wakhtiga la' isla qaatay loo baahan yahay in dib u habeyn, wax-ka-beddel iyo kaabis lagu sameeyo Xeerka Guud ee Doorashooyinka Qaranka iyo Diiwaangalinta Cod-bixiyayaasha Xeer Lr. 91/2023. |
| **Markuu u codeeyey:** | **Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Guud ee Doorashooyinka Qaranka iyo Diwaangelinta Codbixiyayaasha** Xeer **Lr.91/2023** Kal-fadhigii **7aad fadhigiisii 11aad** taariikhduna ku suntanayd **15/01/2023** oo ay goob joog ahaayeen **(71)** mudane oo ka mid ah mudanayaasha **Golaha Wakiillada.** |
| **Markuu Arkay:** | In Golaha Guurtida wax-ka-beddel iyo kaabis ku sameeyeen kuna ansixiyeen **(66)** cod xeerka **Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Guud ee Doorashooyinka Qaranka iyo Diwaangelinta Codbixiyayaasha, Xeer Lr. 91/2023**, kuna taariikhaysnaa **17/02/2023** |

# Wuxuu:

Cod aqlabiyad ah oo **(58 cod)** oo gacan taag ah ku ansixiyay **Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Guud ee Doorashooyinka Qaranka iyo Diwaangelinta Codbixiyaasha** Xeer **Lr.91/2023** halka 12 mudane ka diideen, hal (2) Mudanena ka aamuseen, Guddomiyuhuna muu codayn sida caadada ah.

**ALLAA MAHAD LEH**

| | |
|---|---|
| C/risaaq Siciid Ayaanle | Yaasiin X.Maxamuud Xiir (Faratoon ) |
| Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL | Guddoomiyaha Golaha Wakiilada JSL |

GOLAHA WAKIILADA
JAMHUURIYADDA SOMALILAND

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

## MAXKAMADDA SARE EE DASTUURKA JSL

Supreme Court المحكمة العليا

**MS/GMS/G-7/ 255 /2024** **07/03/2024**

**KU: XEER ILAALIYAHA GUUD EE QARANKA JSL HARGEYSA.**
**OG: GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA JSL HARGEYSA.**
**OG: GUDDIGA DOORASHOOYINKA QARAN JSL HARGEYSA.**
**OG: GUDDOOMIYAHA GUDDIDA DIIWAAN GELINTA URURADA SIYAASADDA& ANSIXITA AS.QARANKA JSL HARGEYSA.**
**OG: GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILADDA JSL HARGEYSA.**
**OG: GUDDOOMIYAHA GOLAHA GUURTIDA JSL HARGEYSA.**
**OG: MADAXWEYNAHA JSL HARGEYSA.**

**UJEEDDO: Gudbin Qaraar.**

Waxaan halka idiinku soo gudbinayaa qaraarka Maxkamadda dasruuriga ah lam. MSD/DDL/01/2024, ee ku taariikhaysan 07/03/2024.

**ALLAA MAHAD LEH**

**Adam Xaaji Cali Axmed**
**GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA SARE ANA**
**GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA DASTUURIGA AH.**

Maxkamadda Dasturriga JSL
The Constitutional Court

**MSD/DDL/01/2024** **07/03/2024**

Ku: Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL **HARGEYSA.**

# Asbaabtii Qaraarka

Maxkamadda Dastuuriga ah ee JSL:-

**Markay aragtay:-** Arjiga ku taariikhaysan 04/03/2024 ujeeddadiisuna tahay "Dacwad Dastuuri ah oo ku saabsan Waafaqsanaan la'aanta Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaan-gelinta Codbixiyeyaasha, Xeer Lr. 91/2023, Qod. 93aad, Faqraddiisa 5aad" ee uu Maxkamadda u soo gudbiyay Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL, arjigaas oo nuxurkiisu ahaa in Mashruuca Sharci Qodobkiisa 93aad, Faqraddiisa 5aad uu ka hor imanayo Dastuurka JSL iyo hannaanka doorashada ee ku xusan isla Mashruuca Sharci, iyada oo asbaabaha ay dacwaddani ku dhisan tahay ay tahay sidan:

1. Qodobka 93aad, Faqraddiisa 5aad waxa uu dhigayaa **"haddii laba xisbi/urur ama in ka badan ay si walba isku leekaadaan tiro iyo boqolay ahaan oo ay ku kala bixi waayayaan hanaanka ku cad Faqradda 1aad ilaa 4aad ee Qodobka, waxa u kala codeynaya Xisbiyada/Ururada isleekaaday labada Gole ee Baarlamaanka oo yeesha Fadhi wada jir ah oo uu Gudoominayo Gudoomiyaha Guurtidu".**
2. Ugu horeyn Qodobka 93aad Faqraddiisa 5aad wuxuu si toos ah uga hor imanayaa Qodobka 38aad ee Dastuurka JSL oo ka hadlaya awoodaha Golaha Baarlamaanka iyo hawshooda fadhiyada wada jirka ah, kamana mid aha waajibaadkooda inay kala doortaan xisbi/urur midna. Labada Gole ee Baarlamaanka JSL waa golayaasha xeer dejinta Qaranka umana igmana inay qabtaan doorasho lagu kala saarayo xisbiyada/ururada



Maxkamada Dasturriga JSL * The Constitutional Court *

siyaasadda ee ku tartamaya doorashada tooska ah, sidoo kalena waajibaadka iyo awoodaha Golayaasha Qaranka gaar ahaan mid kasta ugama mid aha inay doorasho qayb ka noqdaan sida ku cad Qodobada 39, 53, 61 iyo 58 ee Dastuurka.

3. Nidaamka siyaasadeed ee JSL waxa saldhig u ah dimoqraadiyad ku dhisan hanaanka xisbiyada badan, taasi oo ay shacabku awood u leeyihiin in wax doortaan iyagoo kaga qayb qaadanaya doorasho toos ah. Muwaadin kasta oo buuxiya shuruudaha doorashooyinkuna uu xaq u leeyahay in uu wax doorto ama la doorto. Haddaba Faqradda 5aad ee Qodobka 93aad ee Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaan-gelinta Codbixiyeyaasha, Xeer Lr. 91/2023 waxay ka hor imanaysaa xuquuqda siyaasadeed ee muwaadiniinta ee ku xusan Qodobka 22aad, 9aad ee Dastuurka JSL.
4. Hannaanka doorashooyinka Qaranka JSL waa doorasho guud oo laga qabto dalka oo dhan, nidaamka codayntuna waa mid shakhsi ah oo toos ah, isla markaana qarsoodi ah oo ay muwaadiniintu si toos ah u codeeyaan (Direct Elections), balse hanaan doorasho oo labada Gole ee Baarlamaanku si dadban ugu codeeyaan xisbiyada/ururada ku tartamaya doorashada loogu soo baxayo xisbinimadu waxay ka hor imanaysaa Hannaanka Doorashooyinka Qaranka ee ay jidaynayaan Qodobka 22aad ee Dastuurka iyo Qodobada 5aad(3), 91aad(1) ee isla Mashruucan Sharci ee Doorashooyinka Guud iyo Diiwaangelinta Codbixiyeyaashu.
5. Mudanayaasha labada Gole ee Baarlamaanku waxay ka mid yihiin Xisbiyada Qaranka, sidaa daraadeed inay doorashada ka garsooraan oo ay u kala codeeyaan Xisbiyada iyo Ururada ku tartamaya doorashada tooska ah, waxay ka hor imanaysaa mabaadi'da doorashooyinka Somaliland ee ah in la hirgeliyo doorasho xor iyo xalaal ah oo loo maamulay si madax banana oo dhexdhexaad ah.

Sidaas darteed, waxaan Maxkamadda Dastuuriga ah ka codsanaynaa:

1. Inay ogolaato arjigan dacwad furasho dastuuriga ah oo xeer iyo xaqiiq waafaqsan.
2. Inay laasho qodobka 93aad, Faqraddiisa 5aad iyo 6aad ee Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Guud ee



Maxkamada Dasturriga JSL * The Constitutional Court *

Doorashooyinka iyo Diiwaan-gelinta Codbixiyeyaasha, Xeer Lr. 91/2023, maadaama uu ka hor imanayo qodobo dastuuri ah ee aanu kor ku soo sheegnay.

**Markay deristay:-** Isla markaana lafo-gurtay nuxurka dacwaddan dastuuriga ah oo ah "Qodobka 93aad, Faqaradihiisa 5aad iyo 6aad oo u dhigan sidan:

**5. Haddii laba xisbi/urur ama in ka badan ay si walba isu le'ekaadaan tiro iyo boqollay ahaan oo ay ku kala bixi waayaan hannaanka ku cad faqradaha 1 illaa 4 ee qodobkan, waxa u kala codaynaya xisbiyada/ururrada is le'ekaaday labada Gole ee Baarlamaanka oo yeesha fadhi wada jir ah oo uu guddoomiyo Guddoomiyaha Guurtidu.**

**6. Codeynta ku xusan faqradda 6aad ee qodobkan, waxa maamulaya Komishanka Doorashooyinka iyada oo noqonaysa codayn qarsoodi ah (secret ballot).**

miyay ka hor imanayaan Dastuurka JSL mise kama hor imanayaan?"

**Markay deristay:-** Qodobada Dastuurka JSL ee ka hadlaya xuquuqda siyaasiga ah oo xaqa doorashadu uu ka mid yahay iyo cidda xaqqaasi u suganyahay waxa Maxkamadda Dastuuriga ah ee JSL u caddaatay:-

1. In Qodobka 8aad, Faqaraddiisa 3aad ee Dastuurka JSL ay si cad u sheegayso in xuquuqda siyaasiga ahi ay u gaar tahay muwaadiniinta reer Somaliland, Faqradduna waxa ay u dhigan tahay sidan: "**3. Ajaanibka dalka Somaliland sharci ku jooga waxay xeerka hortiisa ku leeyihiin xuquuq iyo waajibaad la siman tan muwaadiniinta, oo ay ka reebban tahay xuquuqda siyaasiga ah ee muwaadiniinta u gaarka ah.**"
2. Muwaadinka leh xuquuqda siyaasiga ah ee ku xusan Qodobka 8aad, Faqraddiisa 3aad ee Dastuurka waxa lagu qeexay Qodobka 4aad, Faqraddiisa 1aad oo u dhigan sidan: "**1. Qof kasta oo u dhashay Somaliland, kana issirran dadkii deggenaa dalka Somaliland 26kii Juun 1960kii iyo ka hor, waxa loo aqoonsanayaa muwaadin Somaliland.**"
3. Xuquuqda siyaasiga ah ee muwaadiniinta u gaarka ah oo xaqqa doorashaduna ka mid yahay waa xuquuqda ku xusan Qodobka 22aad ee Dastuurka JSL oo u dhigan sidan:



Maxkamada Dasturriga JSL * The Constitutional Court *

**1. Muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu ka qayb galo hawlaha siyaasadeed, dhaqaale, bulsho iyo hiddaha si waafaqsan xeerarka iyo Dastuurka.**
**2. Muwaadin kasta oo buuxiya shuruudaha xeerku tilmaamayo wuxuu xaq u leeyahay in la doorto, waxna uu doorto.**

4. Maadaama sida kor ku xusan xuquuqda siyaasiga ah ee xaqqa doorashaduna ka mid yahay ay tahay mid Dastuurku u gaar yeelay muwaadiniinta, ma jirto meel lagu xusay in muwaadinku xaqqiisaa u wareejin karo, u igman karo ama u wakiilan karo cid ku metesha.

5. Xuquuqda siyaasiga ah ee muwaadiniintu waa mid ku dhisan dimoqraadiyad iyo hanaanka xisbiyada badan taasoo uu saldhig u yahay Qodobka 9aad ee Dastuurka JSL oo u dhigan sidan:
**1. Nidaamka siyaasadeed ee Jamhuuriyadda Somaliland waxa saldhig u ah nabad, talo-wadaag, dimuqraadiyad iyo hannaanka xisbiyada badan.**
**2. Tirada xisbiyada siyaasiga ah ee dalka Jamhuuriyadda Somaliland Kama badnaan karaan saddex (3) xisbi.**
**3. Iyada oo xeer gaar ahi habayn doono qaabka loo furan karo xisbi siyaasi ah, waxaa reebban in xisbi lagu dhiso gobollaysi iyo qabyaalad.**

6. Nidaamka siyaasadeed ee muwaadiniintuna ay xuquuqdooda siyaasiga ah kaga qabyqaadanayaan waxa lagu maamulayaa si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka doorashooyinka ee ay Goleyaasha Xeer Dejinta JSL dejiyaan oo ay waajib tahay in aanay ka hor iman Dastuurka JSL, sidaas darteed, Qodobka 93aad, Faqradihiisa 5aad iyo 6aad ee Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaan-gelinta Codbixiyeyaasha, Xeer Lr. 91/2023 ee labada Gole ee Baarlamaanka awoodda u siinaya inay xisbiyo/ururro u kala codeeyaan waxa ay xadgudub ku tahay xuquuqdii siyaasiga ahayd ee Dastuurka u gaar yeelay muwaadiniinta, sidaas darteed waxa ay ka hor imanayaan Dastuurka JSL gaar ahaan Qodobka 8aad, Faqraddiisa 3aad, iyo Qodobada 9aad, iyo 22aad ee Dastuurka JSL.

Maxkamada Dasturriga JSL ★ The Constitutional Court ★

**Markay deristay:-** Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaan-gelinta Codbixiyeyaasha, Xeer Lr. 91/2023 iyo qodobadiisa waxa Maxkamadda u cadaaday arrimahan soo socda:-

1. Qodobka 3aad, Faqraddiisa 2aad, Xarafka b) waxa uu si cad u dhigayaa in mabaadii'da guud ee Xeerku ku dhisanyahay ay tahay xorriyadda muwaadiniintu u leeyihiin in ay adeegsadaan xuquuqdooda siyaasiga ah si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka dalka JSL.
2. Qodobka 5aad ee Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaan-gelinta Codbixiyeyaasha, Xeer Lr. 91/2023 waxa uu dhigayaa xuquuqda codbixiyaha, Faqraddiisa 5aadna waxa ay si cad u sheegaysaa in codku uu ahaado mid shakhsi ah, taasoo meesha ka saaraysa in cid kale metesho ama uu u igmado, waxaanay arrintaasi waafaqsantahay Qodobka 8aad, Faqraddiisa 3aad ee Dastuurka JSL oo sheegaysay in xuquuqda siyaasiga ahi muwaadiniinta u gaar tahay, sidaas darteed, Qodobka 93aad, Faqradihiisa 5aad iyo 6aad waxa ay ka hor imanayaan Qodobka 3aad, Faqraddiisa 2aad oo ah mabaadii'da guud ee xeerka iyo Qodobka 5aad oo dhigaya xuquuqda codbixiyaha.
3. Qodobka 12aad, Faqraddiisa 2aad ee Mahsruuc Sharci Lr. 91/2023 waxa ay dhigaysaa in Komishanka Doorashooyinka Qaranku uu madax banaani buuxda u leeyihiin dhammaan maaliyaddooda, shaqooyinkooda, shaqaalahooda iyo guud ahaan hawlaha doorashooyinka iyo diiwaangelinta cod-bixiyeyaasha, sidaas darteed in Baarlamaanku kaalin ku yeesho doorasho waxa ay dhaawacaysaa madaxbanaanida Komishanka Doorashooyinka Qaranka JSL iyo gudashada xilkooda iyo awoodaha xeerku siiyay ee ku xusan Qodobka 17aad ee Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaan-gelinta Codbixiyeyaasha, Xeer Lr. 91/203.

**Markay u caddaatay:-** In awoodaha labada Gole ee Baarlamaanka ee ku xusan Qodobada 38, 53, iyo 61 ee Dastuurka JSL aanay ka mid ahayn kala saaridda xisbiyada/ururrada siyaasadda.

**Markay aragtay:-** Dhammaan asbaabahaa kor ku xusan oo dhan iyo Qodobada 97 iyo 98 ee Dastuurka JSL iyo Qodobka 15aad ee Xeerka Nidaamka Garsoorka, Xeer Lr. 24/2003, waxa ay soo saartay qaraarkan.



Maxkamada Dasturriga JSL ★ The Constitutional Court ★

# Qaraarkii Maxkamadda

Maxkamadda Dastuuriga ah ee JSL:-

1. Waxa ay aqbashaday arjiga ku taariikhaysan 04/03/2024 ujeedadiisuna tahay dacwad dastuuri ah oo ku saabsan waafaqsanaan la'aanta Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaan-gelinta Codbixiyeyaasha, Xeer Lr. 91/2023, Qod. 93aad, Faqraddisa 5aad.
2. Waxa ay laashay Faqradaha 5aad iyo 6aad ee Qodobka 93aad ee Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaan-gelinta Codbixiyeyaasha, Xeer Lr. 91/2023 maadaama ay labadaa Faqradood si cad uga hor imanayaan Qodobada 8ad, 9aad, 22aad ee Dastuurka JSL, waxaana ka go'aan gaadhista arrimaha doorashooyinka loo raacayaa Qodobada 12aad, Faqraddiisa 2aad, iyo 17aad, Faqraddiisa 16aad ee Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaan-gelinta Codbixiyeyaasha, Xeer Lr. 91/2023.
3. Qaraarkani waxa uu soo baxay maanta oo ay taariikhdu tahay 07/03/2024.

**Guddida Garsoorka:**

1) **Aadam X. Cali Axmed................................(Gudoomiye)** ____________
2) **Maxamed Cumar Geele..............................(Xubin)** ____________
3) **C/qaadir Axmed Maxamuud........................(Xubin)** ____________
4) **Maxamed Faarax Siciid..............................(Xubin)** ____________
5) **Axmed Diiriye Qaalib.................................(Xubin)** ____________
6) **Cali-shucayb Sh. Ibraahim Nuur.................(Xubin)** ____________
7) **C/raxmaan Xuseen Caynaan......................(Xubin)** ____________
8) **Yaxye Cali idiris.........................................(Xubin)** ____________
9) **Cabdillaahi Cabdi Aadan..........................(Xubin)** ____________
10) **C/raxmaan Xasan Nuur.............................(Xubin)** ____________

Maxkamadda Dastuuriga JSL ★ The Constitutional Court

Sahra Ismaaciil Cabdillaahi.........Kaaliyaha Sare ee Maxkamadda Sare ee Dastuurka JSL ____________